



## Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay ka shaqeynayaan barnaamijka ugu horeeyey labada luqadood ee luqada carabiga.

Dugsiyada Dadweynaha Portland wax ay ku faraxsan yihiin soo jeedinta furitaanka barnaamijka labada luqadood wax lagu barto ee Carabiga,kaasi oo ah kii ugu horeeyey kuna cusub Oregon. Waxa aan ka bilaabi doonaan fasalka xannaanada bisha Sebtembar 2018, halkaasi oo ardaydu ay nus maalintii ka mid ah ku baran doonaan luqada Carabiga, halka nuska haray maalintii ay baran doonaan luqada Ingiriiska. Ardayda ku nool degmada Dugsiyada Dadweynaha Portland ee markaas da'doodu tahay 5 sanno ka hor bisha Sebtembar 1deeda barnaamijkaa waa ay u qalmaan inay ka soo qeybgalaan si ay wax ugu bartaan.

Hadafka barnaamijyada Labada Luqadood in wax lagu barto waa in ay dhammaan ardaydu noqdaan kuwa ku hadli kara labo luqadood, korna loo qaado dhaqanka iyo fikir sarre oo laga fikirayo xirfadaha, iyo in loo sameeyo aassaas weyn oo dhinaca waxbarashada una diyaarinaya dugsiya sarre iyo wixii ka sii dambeeya.

Luqada Carabigu waa luqadii ugu dambeysay ee cusub kuna soo biirta barnaamijka Labada Luqadood Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuuna kana mid noqonayaan luqadaha Shiinaha, Jabaaniiska, Isbaanishka, Ruushka, iyo Fiitnaamiiska. Cilmi baaris socotay in ka badan 40 sanno waxa ay sheegeysaa in ardayda labada luqadood wax ku barata ka wanaagsan yihiin ardayda aan ku baran imtixaanada luqada Ingiriiska iyo Xisaabta ee lagu qaado luqada Ingiriiska. Ardayda labada luqadood wax ku barata sida caadiga ah caqliga wuxuu u koraa si ballaaran oo si dabacsan ula qabsanaya, waxa kordha inay muujiyaan sidii ay u xakameyn lahaayeen dareenkooda, iyo iyaga oo leh xirfadaha lagu xalliyo dhibaatooyinka waaweyn sidoo kalena waxa kordha fahamka luqadoodii ay ku hadlaan.

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay ka wada shaqeynayaan madaxda qaabilsan dhismayaasha PPS iyo shaqaalaha iskuulada goobta ugu haboon ee lagu baran lahaa banaamijka Labada Luqadood ee Carabiga. Qoysaska iska diiwaangaliyey waxa ay ka ciyaari doonaa kaalin muhiim ah go'aan ka gaarista goobta barnaamijka laga furayo haddii ay tahay mid ku meel gaar ah ama mid rasmi ah labadaba.

Haddaba si soo jeedinta barnaamijku u hirgasho, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay u baahan yihiin ay wax ka ogaadaan si ay go'aan uga gaaraan heerka xiisaha bulshada Portland. Si aad u muujiso xiisahaaga una hesho macluumaad dheeraad oo ku saabsan soo jeedinta barnaamijka, fadlan waxaad ku soo gudbisaan online foomka ah([online form](#)).

Fadlan ka soo qeybgal kulanada macluumaadka ku saabsan barnaamijyada Labada Luqadood Wax Lagu barto oo lagu qabanayo Xarunta Addeega Waxbarashada Blanchard hoolka Guddiga Golaha Iskuulada ee cinwaankiisu yahay, 501 North Dixon Street:

- Khamiis, Janaayo. 25 saacaduna tahay 6 fiidnimo.
- Isniin, Janaayo. 29 saacaduna tahay 6 fiidnimo.
- Arbaco, Janaayo. 31 saacaduna tahay 10 subaxnimo.

Wax idiin diyaar ah turjubaano idinka caawiya luqada Ingiriiska ah. Fadlan 48 saacadood ka hor waxaad soo codsataa haddii aad u baahan tahay turjubaan adiga oo soo wacaya telefoonka 503-916-3151 ama waxaad email u soo dirtaa aad ku codsaneyso Nga-My Vuong oo email-ku yahay [tvuong@pps.net](mailto:tvuong@pps.net).

**Macluumaad dheeraad ah, fadlan waxaad la xiriirtaa:**

Sanaa' Saifan, Macallinka Luqada Carabiga: 503-916-2000 x78511; [ssaifan@pps.net](mailto:ssaifan@pps.net)

Michael Bacon, Madaxa Labada Luqadood: 503-916-3151; [mbacon@pps.net](mailto:mbacon@pps.net)